

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka Puntland



TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA **FEBRAAYO 2021**

Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Febaraayo, 2021

Muunadda dambiisha adeegga qoysaska Puntland waxay ka koobantahay **387 shey** oo isugu jira **12**-ka qeybood ee hanaanka caalamiga ah ee kala soocidda adeegyada iyo badeecadaha iyadoo loo-eegayo ujeedo isticmaalka badeecad walba. Dambiishaan ayaa loo isticmaalaa lasocoshada iyo xisaabinta isbeddelka qiimaha maciishada.

Shaqaalaha Waaxda Istaatistikada Dawladda Puntland ayaa xogta sicirka mid kasta oo kamid ah 387-daan shey kasoo arruuriya suuqyada dhammaan magaalooyinka waaweyn ee Puntland **si asbuucle ah**.

Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha


Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha Suuqyada Puntland (TSD) ayaa intii lagu guda jiray bishii Febaraayo 2021 hoos uga soo dhacay 87.79, halka uu bishii ka horeysay ee Janaayo 2020 ka ahaa 88.76. Isbedelka bishii dhammaatay ee Febaraayo ayaa ahaa hoos u dhac dhan 0.94 boqolkiiba, halka bishii ka horeysay ee Janaayo 2021 uu isdo kale jiray hoos u dhac dhan 1.52 boqolkiiba.

Qeybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishii Febaraayo sida xoogan hoos ugu dhacay marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: badeecadaha Cuntada Iyo Cabitaanadda (-1.76%), Tubaako iyo khaadka (-1.56%), Caafimaadka (-1.55%), Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska (-0.81%) iyo Gaadiidka iyo adeegga Safarka (-0.37%).

Dhanka kale, hoos u dhaca ku yimid sicirka badeecadaha qeybaha kor ku xusan waxaa qeyb ahaan dheelitiray kor u kac ku yimid Sicirka Agabka qalabeynta iyo qurxinta Aqallada (2.07%), iyo qeybta Dharka iyo Kabaha (0.48 %).

Tan ayaa horseeday isu dhawaanshaha heerka tusaha Guud iyo Jiitimaad ku sugnaanshaha Jaantuuska dhaq-dhaqaaqa Tusaha guud ee sicirka adeegga dambiisha sida ka muuqata jaantuuska hoose.


Jaantuuska 1aad: Jaantuusyada Heerka Sicir Baraka Iyo Dhaqdhaqaaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Bisha Febaraayo, 2021.



Jadwalka 1aad: Heerka Sicirbararka billaha ah ee Febaraayo 2021 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Juulay	
Tusaha (bishaan) = Febaraayo 2021	87.79
Tusaha (bishiihore) = Janaayo 2021	88.76
Tusaha (Janaayao, Sanadkiihore) = Febaraayo 2020	85.33
Isbedelka % billaha ah = Janaayo 2020/ Febaraayo 2021	-0.94
Isbedelka % sanadlaha ah (heerkasicirbararka) = Febaraayo 2020/ Febaraayo 2021	2.88

Jaantuuska 2aad: TSD, Isbedelka Billaha Ah ee Qeybaha Dambiisha



Qaybaha ugumuhiimsan ee isbedelka taban kuyimid bisha Febaraayo 2021

- **Sicirka Cuntada Iyo Cabitaanadda** ayaa hoos u dhacay (-1.76%) intii lagu gudajiray bishii Febaraayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Janaayo 2021 isbedelku ahaa qiimo dhac gaaraya (-2.42%), hoos dhaca sicirka bishaan ayaa loo tirinayaa sicirka Cuntada oo hoos u dhacay (-1.86%).
- **Sicirka Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa waxaa ku yimid hoos dhac dhan (-1.56%) intii lagu guda jiray bishii Febaraayo 2021 halka bishii kasii horeysay ee Janaayo la diiwangaliyey korar dhan (1.15%). Isbedelka bisha Febaraayo waxaa keenay hoos u dhac kuyimid sicirka Tubaakada (-2.48%).
- **Caafimaadka:** sicirka ayaa hoos u dhacay (-1.55%) bishii dhammaatay ee Febaraayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Janaayo la diiwangaliyey qiimo dhac dhan (-1.07%) Sicir jabka caafimaadka ee bisha Febaraayo waxaa keenay sicirka dawada iyo Qalabka caafimaadka oo hoos u dhacay (-3.52%).

- **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantadiyo Gaaska** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (-0.81%) bishii dhammaatay ee Febraayo 2021, marka la-barbardhigo bishii Janaayo oo uu jiray qiimo dhac dhan (-1.38%). Hoos u dhaca bishaan waxaa keenay Sicirka Shidaallada gaasaska cuntada iyo korantadadoo hoos u dhacay (-2.60%).
- **Gaadiidka iyo Adeega Socdaalka** ayaa bishii dhammaatay ee Febraayo 2021 waxaa ku yimid hoos u dhac dhan (-0.37%) halka bishii ka horeysay ee Janaayo la diiwaangaliyey hoos u dhac dhan (-2.70%) Hoos-u-dhaca bisha Febraayo ayaa waxaa sababay sicirka adeega socdaalka (-0.64%).

Qaybaha is-bedelka uga badan ee dhanka Togan Ku Yimid Bisha Febraayo 2021

- **Sicirka Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada** ayaa intii lagu guda jiray bishii tagtay ee Febraayo 2021 waxaa ku yimid sicir koror dhan (2.07%) marka loo eego isbedelkii bishii ka horeysay ee Janaayo 2021 oo la diiwaangashay hoos dhac dhan (-1.20%) Isbeddelka bisha Febraayo ayaa waxaa keenay qiimaha agabyada guryaha oo kordhay (4.91%).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa waxaa ku yimid kor u kac dhan (0.48%) intii laguguda jiray bishii tagtay ee Febraayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Janaayo 2021 la diiwaangaliyey hoos u dhac dhan (-0.36%) Kor u kaca bishaan ayaa waxaa sababay sicirka qiimaha dharka oo kordhay (0.60%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay, Febraayo 2021

Cuntada Iyo Cabitaanada, Kirada Guryaha, Adeegyada, Biyaha, Korontada, iyo Gaaska ayaa celcelis ahaan hadda ah qaybaha ugumuhiimsan dambiisha Addegga, maadama ay saamiga ugu badan ka yihiin kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahaan inay saameynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha


Sida aynu kor kuso sheegnay, **Cuntada Iyo Cabitaanadda** sicirkooda ayaa hoos u dhacay (1.76 %) bishii dhammaatay ee Febraayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Janaayo la diiwaangaliyey qiimo dhac dhan (12.42) Sicirbararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada ayaa 12kii billood ee ku ekaa Febraayo 2021 kordhay (1.52) marka loo eego sicir bararka sanad dhammaadkii ama 12kii billood ee ku ekaa Janaayo 2021 oo gaarayey (4.15).

Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ee qeybaha ugu muhiimsan Cuntada (Diseenbar 2020 ilaa Febraayo 2021)

Magacashayga	December	January	February
Cuntadaiyo Cabitaanada	0.49	-2.42	-1.76
Cuntada	0.50	-2.49	-1.86
Rootiga, Bariisaka, Burka iyobadarka	0.54	-3.57	-1.17
Sonkorta	-0.59	-1.89	0.16
Hilibkanoo cyadaxoolaha	0.06	-1.09	0.56
Kalluunka	0.44	-7.57	0.00
Caanahaliiska ah iyokalluunka	-1.69	-1.73	-1.44
Saliidaiyo ashyaadufankaleh	1.40	0.89	-3.89
Miro Beeraadkasida Cambaha & Muuska	0.02	-0.68	-0.80
Khudaarta Cagaaran	2.08	-3.97	-4.75

Dhanka kale, **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (0.81%) bishii dhammaatay ee Febraayo 2021 marka loo barbardhigo bishii Janaayo oo uu jiray qiimo dhac dhan (1.38%). Sicirbararka sanadlaha ahayaa 12kii bilood ee ku ekaa Febraayo 2021 ayaa ahaa koror dhan (0.45%), halkasanadkii ka horeeyey ee ku dhammaanayey Janaayo 2021 la diiwaangashay sicir-bara rdhan (0.29%).

Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Eegay




Source: Puntland Statistics Department

Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha eeTusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Febaraayo 2021

Isbedelka sanadlaha ah ee heerka sicir bararka 12kii billood ee u dhexeeyey billihii Febaraayo 2020 iyo Febaraayo 2021 ayaa ahaa koror dhan 4.54 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii ku ekaa Janaayo 2021 la diiwaangaliyay sicir koror dhan 6.22 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaday 12-kii billood ee u dhexeeya Febaraayo 2020 ilaa Febaraayo 2021 ayaa kala ah Makhaayadaha Iyo Huteelada (19.02%), Caafimaadka (14.30%), Gaadiidka iyo Adeega socdaalka (9.98%), Badeecadaha isku jirka ah (9.80%), Tubaakada iyo qaadka (5.64%), Dharka iyo Kabaha (4.47%) iyo Agabka qurxinta iyo qalabeynta Aqallada (4.02%).

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaha ah ee qeybaha badeecadaha iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha; Febaraayo 2021.



Qaybaha sicirbararka Xoogan ee sanadlaha ah uu kudhacay sanad dhamaadka Febaraayo 2021

- **Makhaayadaha Iyo Huteelada** ayaa sanad dhammaadkii Febaraayo 2021 kor u kacay (19.02%) marka la barbardhigo sanadkii ku ekaa Janaayo 2021 (15.61%). Isbedelkaan intiisa badan waxaa keenay qiimo koror ku yimid sicirka cuntada (21.78%).
- Sicirka qalabka, adeegyada iyo **dawada Caafimaadka** ayaa intii u dhaxaysay Febaraayo 2020 iyo febaraayo 2021 kacay (14.30%) marka la barbardhigo sicir bararkii sanadkii ku dhammaanayey Janaayo 2020 oo la diiwaan-geliyey koror gaaryey (16.49%) Sicir kororkan waxaa sababay sicirka Adeegyada bukaan socodka (15.44%) iyo siyaaday agabka caafimaadka iyo dawada oo kordhay (13.13%).

- **Gaadiidka iyo Adeegga Socdaalka** ayaa sanad dhammaadkii Febraayo 2021 kor u kacay (9.98%) halka sanad dhamaadkii Janaayo 2021 uu kordhay (9.91%). Isbedelkaan intiisa badan waxaa keenay sicirka adeegyada **Socdaalka** oo kordhay (15.40%).
- **Badeecadaha isku jirka ah** ayaa sanaddhammaadkii Febraayo 2021 sicirkoodu kordhay (9.80%) marka la barbar dhigo 12kii billood ee ku dhammaanayey Janaayo 2021 oo uu jiray koror dhan (18.78%) kor u kacnayaa ka yimid Adeegga daryeelka shaqsiga (25.87%).
- **Sicirka Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa sanaddhammaadki ibisha Febraayo 2021 kor u kacay (5.64%) halka uu sanaddhamaadki Janaayo 2021 uu jiray (9.60%) Isbedlka intiisa ugu badan ayaa ka yimid Tubaakada (9.01%).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa 12kii billood ee kuekaa Febraayo 2021 gaarayey (4.47%) marka loo eego sicirbararka sanad dhammaadkii ama 12kii billood ee ku ekaa Janaayo 2021 oo gaarayey (6.51%). Isbedelkaan intiisa badan waxaa sababay sicirka kabaha oo kordhay (11.71%).
- **Sicirka Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada** ayaa 12kii billood ee ku ekaa Febraayo 2021 kor u kacay (4.02%) halka sanad dhamaadkii Janaayo 2021 la diiwaan-geliyey sicir koror dhan (1.56%) Sicir-bararka qeybtaan ayaa loo anaynayaa Qalabka guryaha (10.49%).


Qeybaha Isgaarsiinta iyo agabka iyo adeegyada dhaqankiyo Madadaalada ayuu isbedelkooda sanadlaha ahaa hoos u dhacay.

Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobiddahaq-dhaqaaqiyo Dhibcokubiirinta Miisaanka Dambiisha

Jadwalka3: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Febraayo 2021 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	Feb-20 Index	Jan-21 Index	Feb-21 Index	Jan-21 to Feb-21 (monthly) % change	Feb-20 to Feb-21 (annual) % change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	85.33	88.63	87.79	-0.94	2.88
Cuntada iyo Cabitaanada	82.12	84.86	83.37	-1.76	1.52
Tubaakada iyo Jaadka	92.47	99.23	97.69	-1.56	5.64
Dharka iyo Kabaha	88.18	91.67	92.11	0.48	4.47
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda kale	86.83	87.15	86.44	-0.81	-0.45
Agabka guryaha iyo Dacdirka	88.54	90.23	92.09	2.07	4.02
Caafimaadka	83.52	96.96	95.46	-1.55	14.30
Gaadiidka	91.13	100.60	100.23	-0.37	9.98
Isgaarsiinta	87.52	87.58	87.61	0.02	0.10
Dhaqanka iyo Madadaalada	101.11	100.42	100.36	-0.06	-0.74
Waxbarashada	88.17	90.61	90.61	0.00	2.77
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	72.08	85.80	85.80	0.00	19.02
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	116.94	128.56	128.39	-0.13	9.80

Jaantuuska 5aad: Sida qaybaha Dambiishu ay Dhibcaha ugu biiriyaan Tusaha Guud iyadaoo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qaybkastaookamid ah qeybahahauukakoobanyahayhanaanka kala soocidabadeecadaha ay kuyeelanaysoisbedelkaTusahaguudeeSicirkaAdeeggaDambiishawaxaykuxiirantahayhadbasaamiculeyska ay qeybwalba ka tahayculeysdhismeedkaGuud.